

KU DHAQAN XAFIIS D.

WAA TII SAXA AHEYD



# Faafin Rasmi ah

EE JUMHURIYADDA DIMUQRADIKA SOMALIYA

Sanadka I

Mogadiscio ah 15 Luliyo 1973

L. 13 Bis

Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah  
ee ka tirsan Madaxtooyada Golaha Sare ee Kacaanka

## FAAFIN BIL SOO BAXA

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo, Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba shilin — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

## KOBNIIIN

### BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

### BOGGA LABAAD

#### XEER DOWLADEED

- . XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KA-CAANKA 23 Juunyo 1973, L. 66 — *Dhismo Goballo Cusub.* Bog. 207
- XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KA-CAANKA, 23 Juunyo 1973, L. 67 — *Magacaabid Idaaro Guddi.* » 209
- XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KA-CAANKA, 23 Juunyo 1973, L. 68 — *Dhismo Degmooyin Cusub.* » 210
- XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KA-CAANKA, 23 Juunyo 1973, L. 69 — *Magacaabid Gud-diyo Goballo.* » 212

- XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KA-  
CAANKA, 23 Juunyo 1973, L. 70 — *Degmo laga be-*  
*deli qaybta derejada « C » loona bedeli qaybta dere-*  
*jada « A ».* Bog. 215
- XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA, 26  
Juunyo 1973, L. 71 — *Qiimaha Bastada.* » 217
- 

## BOOGA SEDEEXAAD

### TALOOPYIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH

---

- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 26 Juunyo 1973 —  
*Baddalaad Naado Dhul Cismacil Shire Moxamed.*  
L. 100. Bog. 219
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 3Luliyo 1973 —  
*Baddalaad Naado Dhul Moxamed Jumale Rage.* L. 101 » 220
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Luliyo 1973 —  
*Baddalaad Naado Dhul Moxamed Shikh Dahir.* L. 102. » 221
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Luliyo 1973 —  
*Baddalaad Naado Dhul Moxamed Shikh Moxamed*  
*Dahir.* L. 103. » 221
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8 Luliyo 1973 —  
*Naada Dhul Khadija Macallim Cosman.* L. 104. » 222
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8 Luliyo 1973 —  
*Naada Dhul Cabdalla Cusman Cali.* L. 105. » 222
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD 8 Luliyo 1973 —  
*Naada Dhul Cali Shikh Abikar.* L. 106. » 223
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Luliyo 1973 —  
*Naada Dhul Moxamed Axmed Ciimi iyo Axmed Ciimi*  
*Dauaale.* L. 107. » 224
- WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 10 Luliyo 1973 —  
*Naada Dhul Moxamed Jamac Ciimi.* L. 108. » 224
-

## **BOGGA KOOWAAD SHARCIYO**

**W. M.**

---

## **BOOGA LABAAD XEER DOWLADEED**

**XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

23 Juunyo 1973, L. 66.

Dhismo Goballo cusub.

### **GUDDOONSHAHA**

#### **GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ASAGOO ARKAY xaashidii 1d iyo tii 2d ee Kacaanka 21 Okto-  
bar 1969;

ASAGOO ARKAY qodobka 3d (lambarka 2d) ee sharciga lam-  
barkiisu yahay 52 ee la soo saaray 8d bisha junyo 1972;

ASAGOO TIXRAACAYA go'aankii ka soo baxay Guddiga Go-  
laha Sare iyo Xoghayeyaasha Dowladda;

ASAGOO TIXGELINAYA taladii uu soo jeediyay Xoghayaha  
Dowladda ee Wasaarada Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY baahida loo qabo in Ceerigaaba iyo Dhuu-  
samareeb laga dhigo Goballo.

### **WUXUU GOOYAY**

Qodobka 1d

1. Degmooyinka Ceerigaabo, Laasqoray iyo Gar-adag waxaa laga  
gooyay Gobalka Togdheer oo ay hore uga tirsanaayeen waxaana laga  
dhigay Gobal cusub oo lagu magacaabay «SANNAG». Gobolka «SA-  
NAAG» wuxuu ka koobanyahay Degmada Ceerigaabo oo saldhig u ah  
Guddiga Gobolka, Degmada Laasqoray iyo Degmada Gar-adag.

2. Degmooyinka, Dhuusamareeb, Cabudwaaq, Ceelbuur<sup>1</sup> iyo  
Ceeldheer, waxaa laga gooyay Gobalka Mudug oo ay hore uga tirsanaayeen waxaana laga dhigay Gobal cusub oo lagu magacaabay «GAL-  
GUDUUD». Gobalka «GALGUDDUD» wuxuu ka koobanyahay Deg-  
mada Dhuusamareeb oo saldhig u ah Guddiga Gobalka, Degmada Ca-  
buudwaaq, Degmada Ceelbuur, iyo Degmada Ceeldheer.

Qodobka 2d

Guddiyada Degmooyinka C. gaabo iyo D. Mareeb waxaay gelayaan darajada xarafto « A » ee qodobka 10d ee sharciga 8dii bisha iunyo 1972 lambarkiisuna yahay 52.

Qodobka 3d

Go'aankani si degdeg ah buu u dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 23 Junyo 1973.

DUDDOOMIYAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*S. Gaas Maxamed Siyad Barre*

XOGHAYAHA DAWLADDA EE  
WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA  
*Kusime S. Gaas Moxamed Siyad Barre*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 80.*  
*Mogadiscio, li 2 Luglio 1973.*  
*Il Magistrato ai Conti:*  
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

---

**XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

23 Juunyo 1973, L. 67.

Magacaabid Idaaro Guddi.

**GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ASAGOO ARKAY xaashidii 1d iyo tii 2d ee Kacaanka 21kii Okto-  
ba 1969;

ASAGOO ARKAY qodobka 8d iyo kan 10d ee sharciga la soo  
saaray 8dii junyo 1972 lambarkiisuna yahay 52;

ASAGOO TIXGELINAYA taladii uu soo jeediyay Xoghayaha  
Dowladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY baahida looqabo in qof ka socda Wasaa-  
radda Kalluunka iyo Gaadiidka Badda uu ka mid noqdo Idaaradaha  
Guddiyada Gobollada iyo kuwa Degmooyinka.

**WUXUU GOOYAY**

Qodobka 1d

In qofka madaxda ka ahi maamulka hawlaha Wasaarada Kalluun-  
ka iyo Gaadiidka Badda ee Gobolka uu ka mid yahay Idaaradda Gud-  
diga Gobolka, qofka madaxda ka ahina isla hawlaha Wasaaraddas ee  
ka furan Degmada uu ka mid yahay Idaaradda Guddiga Degmada.

Qodobka 2d

Go'aankani si degdeg ah buu u dhaqan geli waana in lagu qoro  
faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 23 Junyo 1973.

**GUDDOOMIYAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**  
*S. Gaas Maxamed Siyad Barre*

**XOGHAYAHA DAWLADDA EE  
WASAARADDA ARRIMAH GUDAHA**  
*Kusime S. Gaas Moxamed Siyad Barre*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 81.*  
*Mogadiscio, li 2 Luglio 1973.*  
*Il Magistrato ai Conti:*  
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

**XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

23 Junyo 1973, L. 68.

Dhismo Degmooyin Cusub.

**GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ASAGOO ARKAY Xaashidii 1d iyo tii 2d ee Kacaanka 21 Okto-  
bar 1969;

ASAGOO ARKAY Qodobka 3d (lambarka 3d) ee Xeerka lambar-  
kiistu yahay 52 lana soo saaray 8dii bisha Jun 1972;

ASAGOO TIXGELINAYA Taladii Guddiga Golaha Sare iyo  
tilmaantii Xoghayaha Dawladda ee Wasaaradda Arrimaha Gudaha;

ASAGOO OGAADAY Baahida loo qabo in Degmooyin laga dhigo  
tuulooyinka Dolow ilo Yed.

**WUXUU GOOYAY**

**Qodobka 1d**

Waxaa la baabi'yay maamulkii hoose ee Dolo ku xirayay Degmada  
Luq-ganane.

**Qodobka 2d**

Waxaa degmooyin cusub laga dhigay Dolow iyo Yed.

**Qodobka 3d**

1. Sohdinta kala qaybta Degmada Luq iyo tan Dolow, geesta  
qorax u dhac waxay bilaabataa Buurta Kabira oo Luq u jirta 30 Km.  
Dolowna u jirta 40 Km. geesta koofureed waxay ku egtahay Togga  
Carracase oo Buurta Kabira u jirta 45 Km. Soohdinta kala qaybisa  
Degmada Dolow iyo tan Bulu-Xawa, geesta qorax u dhac waxay billaa-  
bataa Hilada Unsi Gudda oo u jirta Dolow 25 Km. Buulo Xawo-na u  
jirta 15 Km., geesta koonfureed carracase bay uga dhici soohdintii kale  
ayadoo Unsi gudda ka socotay 40 Km. Carracase waxaa isaga soo dhaca  
soohdimaha Luq, Dolow iyo Bulu Xawao.

2. Soohdinta kala qaybisa Degmada Wajid iyo tan Yeeded, geesta  
Waqooyaad waxay ka billaabataa Buur Sanweyne oo Wajid u jirta 55  
Km., Yeed-na u jirta 41 Km., geesta qorax ka soo baxeed-na waxay ku  
egtahay Lagalaay oo u jirta Buur Sanweyne 45 Km., Yed-na u jirta 54  
Km., Xuddur-na u jirta 54 Km., geesta waqooyaad waxay ku dha-  
maataa Aqbla, oo u maro xad beenaadka u dhexeeya Jamhuriyadda Di-  
moqradiga Somaliya iyo Dawladda xabashida, geesta qorax u dhac  
waxay ku dhamaan Buur Qalinley oo Yed u jirta 45 Km., waqooy bay  
u laaban waxayna xad beenaadka ka geli dhuurey iyo Goryaale dhex-  
dooda.

Qodobka 4d

Go'aankanu wuxuu u dhaqan gelayaa si degdeg ah waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho. 23 Junyo 1973.

GUDDOOCIYAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*S. Gaas Maxamed Siyad Barre*

XOGHAYAHA DAWLADDA EE  
WASAARADDA ARRIMAHA GUDAYA  
*Kusime S. Gaas Moxamed Siyad Barre*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 82.*  
*Mogadiscio, li 2 Luglio 1973.*  
*Il Magistrato ai Conti:*  
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

---

**XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA**

23 Junyo 1973, L. 69.

Magacaaw Guddiyo Goballo.

**GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA**

ASAGOO ARKAY xaashidii 1d iyo tii 2d ee Kacaanka 21 Okto-  
bar 1969;

ASAGOO ARKAY qodobka 8d ee Xeerka labarkiisu yahay 52  
lana soo saary 8dii bisha Jun 1972;

ASAGOO ARKAY qodobka 2d ee Xeer Dowladeedka lambarkisu  
yahay 49 lana soo saaray 8dii bisha febrayo 1973 k kaesoo lagu dhisay  
Goballo iyo Degmooyin Cusub;

ASAGOO TIXGELINAYA tilmaantii Xoghayaha Dowladda ee  
Wasaaradda Arrimaha Cudaha;

ASAGOO OSAADAY baahida loo qabo in Guddiyo loo maga-  
caabo Gobollada Shabeelaha Dhexe, Shabeelaha Hoose iyo kan Nugaa-  
leed.

**WUXUU GOOYAY**

Qodobka 1d

1. Waxaa la magacaabay Guddiyo loo xil saaray maamulidda Go-  
bollada Cusub ee Shabeelaha Dhexe, Shabeelaha Hoose iyo kan Nu-  
gaa-leed.

2. Guddi kasta oo ka mid ah Guddiyadaas waxaa loo aqoonsa-  
day qofnimo sharci oo daa'in ah.

Qodobka 2d

*Ka koobnaanta Guddiyada*

1. Guddiga Gobolka Shabeelaha Dhexe wuxuu ka koobanyahay:

Guddomiye lagu magacaabay Xeer Dowladeed Guddoomiyaha Go-  
laha Sare ee Kacaanka;

- |  |        |
|--|--------|
| — Taliyaha Qaybta Xogga ee Gobolka                     | Idaaro |
| — Taliyaha Qaybta Boliska ee Gobolka                   | »      |
| — Taliyaha Qaybta Ilaalinta Nabadda Ummadda ee Gobolka | »      |
| — Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka                      | »      |
| — Maamulaha Laanta Iacagta ee Gobolka                  | »      |
| — Maamulaha Laanta Hawsha Dhismaha Guud ee Gobolka     | »      |
| — Maamulaha Hawlaha Ciyaaraha iyo Shaqada ee Gobolka   | »      |



- Maamulaha Hawlaha Xoolaha, Dirta iyo Daaq ee Gobolka      Idaaro
- Maamulaha Laanta Bangiga ee Gobolka      »
- Maamulaha Laanta Beeraha ee Gobolka      »
- Maamulaha Hawlaha Biyaha iyo Macdinta ee Gobolka      »
- Maamulaha Hawlaha Bostada iyo Isgaarsiinta ee Gobolka      »
- Maamulaha Laanta Xafiiska Xiriirka Dadweynaha ee Gobolka      »
- Maamulaha Laanta Gaadiika Dowladda ee Gobolka      »
- Maamulaha Wakaaladda Ganacsiga ee Gobolka      »
- Maamulaha Wakaaladda Horumarinta Beeraha ee Gobolka      »
- Maamulaha Wakaaladda Kannaanada Xoolaha ee Gobolka      »
- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Jowhar      »
- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Cadale      »
- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Aden Yabal      »
- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Balcad      »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Jowhar lagana soo saaray Guddiga Degmada      »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Cadale lagana soo saaray Guddiga Degmada      »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Aden Yabal lagana soo saaray Guddiga Degmada      »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Balcad lagana soo saaray Guddiga Degmada      »
- Maamulaha Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta ee Gobolka      »

2. Guddiga Gobolka Shabeelaha Hoose wuxuu ka koobanyahay:

- Guddoomiye lagu magacaabay Xeer Dowladeed Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka      Idaaro
- Taliyaha Qaybta Xogga ee Gobolka      »
- Taliyaha Qaybta Boliska ee Gobolka      »
- Taliyaha Qaybta ilaalinta Nabadda Ummadda ee Gobolka      »
- Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka      »
- Maamulaha Laanta Lacagta ee Gobolka      »
- Maamulaha Laanta Hawsha Dhismaha Guud ee Gobolka      »
- Maamulaha Hawlaha Ciyaaraha iyo Shaqada ee Gobolka      »
- Maamulaha Hawlaha Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa ee Gobolka      »
- Maamulaha Laanta Bangiga ee Gobolka      »
- Maamulaha Laanta Beeraha ee Gobolka      »
- Maamulaha Hawlaha Biyaha iyo Macdinta ee Gobolka      »
- Maamulaha Hawlaha Bostada iyo Isgaarsiinta ee Gobolka      »
- Maamulaha Laanta Xafiiska Xiriirka Dadweynaha ee Gobolka      »
- Maamulaha Laanta Gaadiidka Dowladda ee Gobolka      »
- Maamulaha Wakaaladda Ganacsiga ee Gobolka      »
- Maamulaha Wakaaladda Horumarinta Beeraha ee Gobolka      »
- Maamulaha Wakaaladda Xannaanada Xoolaha ee Gobolka      »
- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Marka      »

- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Barawe Idaaro
- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Afgoye »
- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Wanle Weyn »
- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Qoriyoley »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Marka lagana soo saaray Guddiga Degmada »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Afgoye lagana soo saaray Guddiga Degmada »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Wanle Weyn lagana soo saaray Guddiga Degmada »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Qoriyoley lagana soo saaray Guddiga Degmada »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Barawe lagana soo saaray Guddiga Degmada »
- Maamulaha Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta ee Gobalka »

3. Guddiga Gobolka Nugaaleed wuxuu ka koobanyahay:

- Guddoomiye lagu magacaabay Xeer Dowladeed Guddoomiyaha Golaha Sare ee Kacaanka.
- Taliyaha Qaybta Xogga ee Gobolka Idaaro
- Taliyaha Qaybta Boliska ee Gobolka »
- Taliyaha Qaybta Ilaalinta Nabadda Ummadda ee Gobolka »
- Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka »
- Maamulaha Laanta Lacagta ee Gobolka »
- Maamulaha Laanta Hawlaha Dhismaha Guud ee Gobolka »
- Maamulaha Hawlaha Ciyaaraha iyo Shaqada ee Gobolka »
- Maamulaha Hawlaha Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa ee Gobolka »
- Maamulaha Laanta Bangiga ee Gobolka »
- Maamulaha Laanta Beeraha ee Gobolka »
- Maamulaha Hawlaha Biyaha iyo Macdinta ee Gobolka »
- Maamulaha Hawlaha Bostada iyo Isgaarsiinta ee Gobolka »
- Maamulaha Laanta Xafiiska Xiriirka Dadweynaha ee Gobolka »
- Maamulaha Laanta Gaadiidka Dawladda ee Gobolka »
- Maamulaha Wakaaladda Ganacsiga ee Gobolka »
- Maamulaha Wakaaladda Horumarinta Beeraha ee Gobolka »
- Maamulaha Wakaaladda Xannadada Xoolaha ee Gobolka »
- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Garowe »
- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Eylil »
- Guddoomiyaha Guddiga Degmada Lascanod »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Garowe lagana soo saaray Guddiga Degmada »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Eylil lagana soo saaray Guddiga Degmada »
- Qof wakiil ka ah Dadweynaha Degmada Lascanod lagana soo saaray Guddiga Degmada »
- Maamulaha Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta »

Qodobka 3d

Go'aankani si degdeg ah buu u dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 23 Junyo 1973.

GUDDOOMIYAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA  
*S. Gaas Maxamed Siyad Barre*

XOGHAYAHA DAWLADDA EE  
WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA  
*Kusime S. Gaas Moxamed Siyad Barre*

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 82.  
Mogadiscio, li 2 Luglio 1973.  
Il Magistrato ai Conti:  
Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

---

XEER GUDDOONSHAHA GOLAHA SARE EE KACAANKA  
23 Junyo 1973, L. 70.

Degmo laga bedeli qaybta derejada « C » loona bedeli qaybta derejada « A ».

GUDDOONSHAHA  
GOLAHA SARE EE KACAANKA

ASAGOO ARKAY xaashidii 1d iyo tii 2d ee Kacaanka 21 Okto-  
bar 1969;

ASAGOO ARKAY qodobka 3d (lambarka 3d) iyo kan 10d ee  
Xeerkii lambarkiisu yahay 52 lana soo saaray 8dii bisha jun 1972;

ASAGOO ARKAY qodobka 2d ee Xeer Dowladeedka ee lambar-  
kiisu yahay 49 lana soo saaray 8dii bisha febrayo 1973;

ASAGOO TIXGELINAYA tilmaantii Xoghayaha Dowladda ee  
Wasaaradda Arrimaha Gudahe;

ASAGOO OGAADAY baahida loo qabo in Degmada Garowe  
ahna saldhiga Guddiga Gobolka Nugaaleed laga bedelo derejada « C »

WUXUU GOOYAY

Qodobka 1d

1. Degmada Garowe saldhigna u ah Guddiga Gobolka Nugaaleed waxaa laga bedelay derejada « C » waxaana laga dhigay derejada « A ».
2. Guddiga Degmadaasi wuxuu ka kooban yahay 17 qofood.

Qodobkt 2d

Go'aanikani si degdeg ah buu u dhaqan geli waana in lagu qoro faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

Muqdisho, 23 Junyo 1973.

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE EE KACAANKA

*S. Gaas Maxamed Siyad Barre*

XOGHAYAHA DAWLADDA EE  
WASAARADDA ARRIMAHA GUDAHA

*Kusime S. Gaas Moxamed Siyad Barre*

*VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 83.*

*Mogadiscio, li 2 Luglio 1973.*

*Il Magistrato ai Conti:*

Magg. ABDULLAHI WARSAME NUR

---

**XEER WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA**

26 Junyo 1973, L. 71.

Qiimaha Bastada.

**WASAARADDA GANACSIGA GUDAHA**

Ayado la arkay go'aankii 1d ee Kacaanka oo soo baxay 21kii Oktoobar 1969.

Ayado la arkay go'aankii 2d ee Kacaanca oo soo baxay Jan. 1971.

Ayado la arkay Sharciga Lam. 17 ee soo baxay 17 Jun 1967 ee ku saabsana ilaalista qiimaha alaabta lagama maarmaan ka ah.

Ayado la tixgelinaayo is baddalkii asaarta suuqa addunka ee aanu baastada ka soo qaadano gaar ahaan boqolkiiba qiimihii wax lagaga soo gaadanjiray ay ku korortay boqolkiiba 50 (konton iyo dheerat).

Ayado la arkay Sharciga Lam. 172 ee soo baxay 4 Novembar 1972 ee ku saabsanaa sicirki bastada waxaa lagama maarmaan noqotay in sicirkaas wax laga baddalo.

Ayado la Maqlay Guddigii lagala tashanayey ilaalista sicirka alaabta lagama maarmaan ka ah.

**WAXAA SHARCI LAGA DHIGAY**

Qodobka 1d

Ascaarta aanu bastadu waxay noqondoonta sida aannuu u goynay ee hoos ku taal laga bilaaba 20-5-1973.

**S I I C I R K I I**

Lamb.	Badeecadda	W. G. U. Waxay ku Gadeyso	Dukamada Macdaaradaaha waxay ku Gadayaan Tafariqda
	<b>BAASTA LUSO</b>	<b>Kg.</b>	<b>Kg.</b>
1	Cirio	5.30	5.50
2	Raconto	3.80	4.00
3	Buitoni	5.30	5.50
4	Triestion (Mirmar)	3.80	4.00
	<b>BAASTA COMUNE</b>		
	<b>I Grado</b>		
5	Saempa	2.90	3.05

		S I I C I R K I I	
Lamb.	Badeecadda	W. G. U. Waxay ku Gadeyso	Dukamada Macdaaradaaha waxay ku Gadaayaan Tafariqda
III Grado			
6	Eagle Brand	2.50	2.65
7	Affarghed	2.50	2.65
8	Italy	2.50	2.65
9	Ferro	2.50	2.65
10	Triestino D'Oro-Tergeste	2.50	2.65
11	Gargiulo	2.50	2.65
12	Abu Gheni	2.50	2.65
13	Ardolino	2.50	2.65
14	Racconto	2.50	2.65
15	Impera	2.50	2.65
16	Apra	2.50	2.65
17	Maoter	2.50	2.65
BAASTA MACARONI LUSO			
18	Cirio	5.30	5.50
19	Buitoni	5.30	5.50
20	Racconto Lusso	3.80	4.00
21	Triestino Lusso	3.80	4.00
BAASTA MACARONI COMUNE			
22	Rex Brand	2.75	2.90
23	Triestino	2.15	2.30

Qodobka 2d

Sharcigaan waxaa lagu faafin doona buuga Dawladda ee rasmiga ah. Waxana amar laga dhigahayaa in rux kasta oo arrintaan lug ku leh in uu ilaaliyo Sharcigan, gacana ka geeysta sidii dadka kale uu in ilaalin lahaa sidii qaynuunka dadka.

Muqdisho, 26 Junyo 1973.

Xoghayaha Wasaaradda Ganacsiga Gudaha

*Jaalle Axmed M. Maxamud*

VISTO e registrato - Reg. n. 1, foglio n. 84.

Mogadiscio, li 3 Luglio 1973.

Il Magistrato ai Conti:

MAGE ARDII LAHI WARSAME NIIR

**BOGGA LABAAD**  
**TALOoyIN, ISGARSIIN, OGEYSIIS, IYO WAXII LA MID AH**

---

**WASAARADDA HAWLAHA GUUD**

---

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Cismacil Shire Moxamed kuna yaal Muqdisho, xafadda warshada caaraha T. G. N. 677-67*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda Warshada Caaraha, kuna fadhiya 3.000 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd MWD 677-869-68 ee 6-6-1968, waxy isku baddashey sida soo socota:

Duhlka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas rektangular 30x20 — 600, oo ku fadhiyaa mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi dhul L. 279; Koofur Jid; Galbeed dhul L. 284; Bari Jid.

Muqdisho, 25 Junyo 1973.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*Baddalaad naado dhul leeyahay Jaalle Moxamed Jumale Rage kuna yaal Muqdisho, xafadda Wadada Afgoye T. G. N. 534-68*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda wadada Afgoye, kuna fadhiya 3000 mdh., waxaa la addeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd MWD 534-1141-68, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21ka Oktobar, waxuuna leeyahay qiyaas rektangular 30x20, oo ku fadhiyaa 600 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi gabal dhul lam. 608; Koofur Jid; Galbeed gabal dhul lam. 615; Bari gabal dhul lam. 618.

Moqdisho, 3 Lulyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(101)

*Kusime Inj. Cabdikarim Cige Guled*



WASAARADDA HAWLAHA CUUD

---

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Moxamed Shikh Moxamed Dahir kuna yaal Muqdisho, xafadda Valle Nord T. G. N. 867-62*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda Valle Nord, kuna fadhiya 2760 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 546651 ee 14-5-1964, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda Jidka 21 Oktoobar, waxuuna leeyahay qiyaas Aar gees, oo ku fadhiyaa 400 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi Dhul L. 3; Koofur Jid; Galbeed Dhul L. 7; Bari Dhul L. 9.

Muqdisho, 10 Luliyo 1973.

(102) Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saacid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

*Baddalaad naado dhul uu leeyahay Jaalle Moxamed Shikh Dahir kuna yaal Muddisho, xafadda Valle Nord T. G. N. 970-62*

Jaallaha kor ku magacaaban, oo horay loo siiyey dhul ku yaal Muqdisho, xafadda Valle Nord, kuna fadhiya 2501 mdh., waxaa la caddeynayaa in looga qaaday danta guud.

Naadadii hore ee lagu soo diray warqaddi tiradeedu ahayd 546652 ee 14-5-64, waxay isku baddashey sida soo socota:

Dhulka cusubi wuxuu ku yaal Muqdisho, xafadda 21 Oktoobar, waxuuna leeyahay qiyaas Rektangular, oo ku fadhiyaa 1.200 mdh., soohdin waxuu la leeyahay;

Waqooyi Jidka 21 Oktoobar; Koofur Dhul L. 193; Galbeed Dhul L. 189; Bari Dhul L. 191.

Muqdisho, 10 Luliyo 1973.

(103) Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Saacid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Khadija Macallim Cosman, u soo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 28-2-1958, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dawladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Xaji Rajab, oo leh qiyaas L (là) 28, 50, 26, 15, kuna fadhiya 1.088 mdh.

Soodhin: Waqooyi Jid; Koofur Xerada Carurta askafta; Galbeed Xaji Moxamed Weliyo; Bari Xajia Culuma.

Qofkii dannaynaya wuxuu si fiican uga arki karaa naqshda dhulka oo taal Lanta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga loodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, oo laga bilaabo maantii lagu naadshey buuga xeerka dawladda, laguna dhejiyey meesha loogu tala galay ogeysiiska dawladda Hoose, laguna dhigay wargeska xiddiga Oktoobar.

Muqdisho, 8 Luliyo 1973.

(104) Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Sacid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdalla Cusman Cali, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 19 Marso 1967, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda M. Cab. Xalane, oo leh qiyaas rektangular (60x20), kuna fadhiya 1200 mdh.

Soohdin: Waqooyi dhul horay loo baxshay; Koofur dhul horay loo baxshay; Galbeed dhul horay loo baxshay; Bari Jid.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga loodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lagu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Luliyo 1973.

(105) Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka  
*Maxamed Cabdi Sacid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Shikh Abicar, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 2 Junyo 1972, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Yaq Shid, oo leh qiyaas Afar gees isle'eg, kuna fadhiya 20x20 — 400 mdh.

Soohdin: Waqooyi Gabal dhul lam. 1493; Koofur Jid; Galbeed Gabal dhul lam. 1492; Bari Suuqa Jungala.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga loodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka dawladda.

Muqdisho, 8 Luliyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(106)

*Maxamed Cabdi Sacid*

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Moxamed Axmed Cilmi iyo Axmed Cilmi Ducaale, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 2 Junyo 1968, uu ku weydiisanayey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Wardigley, oo leh qiyaas Trabetsiyo, kuna fadhiya 2.957,50 mdh.

Soohdin: Waqooyi Jid; Koofur Jaallayaasha Yuusuf Wehliye iyo Moxamed Cali; Galbeed Jidka Shariif Calawi Shaa; Bari Jaalle Cali Axmed.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga loodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 10 Luliyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(107)

*Maxamed Cabdi Sacid*

---

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

---

N A A D A D H U L

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Moxamed Jama Cilmi, u usoo qortay arji qaybta Dhismaha iyo Dhulka 14-8-1972, uu ku weydiisana-yey dhul dhismo dowladeed kuna yaal Muqdisho xafadda Valle Nord, oo leh qiyaas Rektangular, kuna fadhiya 14,7x29,5 — 453,29 mdh.

Soohdin: Waqooyi Farah Cabdulle; Koofur Jid; Galbeed Jid; Bari Xaji Axmed iyo Mohamed Mire.

Qofkii dannaynayaa wuxuu si fiican uga arki karaa naqshadda dhulka oo taal Qaybta Dhismaha iyo Dhulka ee Wasaaradda Hawlaha Guud, dhulkaa waxaa laga loodi karaa muddo ku siman 30 (soddon) maalmood, ee laga bilaabo maantii lugu naadshey buuga xeerka daw-ladda.

Muqdisho, 10 Luliyo 1973.

Maamulaha Qaybta Dhismaha iyo Dhulka

(108)

*Maxamed Cabdi Sacid*